Gacaliyeyaal Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha,

KU SOO DHAWOW XANAANADA IYO FASALKA 2034!

Dugsiyada Dagmada Westerville waxaa laga helaa Xanaanada Maalin-Barkeed iyo Xanaanada Maalinta-Idil gudaha dugsi kasta oo ku yaal xaafadda. Xanaanada Maalinta-Idil waa brograam ku saleysan khidmad, brograamka bakhtiyaa nasiibka iyo kaalmada kharashka waxbarashadaay ay heli karaan kuwa xaqa u yeesha. Qof kasta oo doona in uu dalbado bakhtiyaa nasiibka Xanaanada Maalinta-Idil, wuxuu samayn karaa sidaas laga bilaabo maalinta Jimcaha, Janaayo 8, 10:00 a.m. kaddib marka uu dhamaystiro arjiga Xanaanada Maalinta-Idil taasoo qeyb ka ah arjiga diiwaan gelinta internetka. Tafaasiil dheeraad ah waxaa laga heli karaa www.wcsoh.org/ADK.

Fiiri *Xanaanada 101* ee laga heli karo www.wcsoh.org/kindergarten badan oo ku saabsan habkena diiwaan gelinta internetka. Arjiga diiwaan gelinta internetka wuxuu adiga ku siin doonaa fursad aad ku qabsatid ballanka diiwaan gelinta marka la gaaro dhamaadka arjiga. Fadlan hubso in aad in aadilaaliyaha sharciga aad ugu soo dartid email shaqeeya.

Waqti hore isku qor si aadan ula kulmin degdeg! Waxaan ballamada diiwaan gelinta siinay sided (8) todobaad sii loo diiwaan geliyo ardaydena cusub iyo si waqti ku filan loo siiyo qorsheynta hawlaha habboon ee fasalka, jidadka la mariyo gaadiidka, tirada ardayda fasalka iyo gelitaanka bakhtiyaa nasiibka Xanaanada Maalinta-Idil.

Si aad horay isaga qortid internetka, laga bilaabo Jimco, Janaayo 8, 10:00 a.m., fadlan booqo:

1. Bogga internetka www.wcsoh.org. Riix sanduuqa 'Diiwaan Gelinta' cagaaran '*Ku qor arday ama cinwaanka aad iminka daggan tahay*' sanduuqa.

2. Bogga xiga, Diiwaan Gelinta Cunugaada, waxaad riixi doontaa battanka *Diiwaan Gelinta* cassanka *2021-2022,* kaasoo kuu gudbin doono bogga Diiwaan Gelinta kuna siin doono macluumaad tafatiran oo ku saabsan diiwaan gelinta.

3. Riix battanka cagaaran *Iminka Bilow Isku Qoridda*, taasoo kuu furi doonto arjiga internetka.

4. Waxaa lagu fari doonaa in aad samaysatid magaca isticmaalaha (user name) iyo erayga lagu galo (password) (fadlan qoro kaddibna keydso), kaasoo kuu ogolaan doono in aad bilowdid hawsha, keydsatid macluumaadka, kaddibna taariikh dambe ku soo noqotid si aad u dhamaystirtid (haddii loo baahdo).

5. Ballanka lagu siiyay waa boos haaye, wuxuu ogeysiiyaa kooxdena Diiwaan Gelinta in uu jiro arji diiwaan gelin la soo gudbiyay oo diyaar u ah in laga shaqeeyo. Ballankaada waxaa lagu soo gudbin doonaa email keliya, bacdamaa goobtena xafiiska OhioHealth ka **XERAN** tahay dadweynaha.

6. Waxaa emailkaada kaala soo xariiri doono Ku-Takhasusaha Diiwaan Gelinta (Enrolment Specialist) kaasoo xaqiijin doono warqadaha loo baahan yahay si uu kuugu kaalmeeyo hawsha diiwaan gelinta ugu dambeeyo.

7. Warqadaha loo baahan waxaa iminka toos loo soo gelin karaa lana adeegsado arjiga diiwaan gelinta internetka AMA waxaad u baahan tahay in aad warqadaha loo baahan yahay email ugu soo dirtid Ku-Takhasusahaada Diiwaan Gelinta (Enrollment Specialist).

Waxaan rajeyneynaa in aan adiga iy ardaygaada Xanaanada kugu soo dhaweyno qoyskena Dugsiga Westerville!

Si aad u bilowdid Hawsha Diiwaan Gelinta, fadlan booqo www.wcsoh.org/enroll

WARQADAHA LOOGA BAAHAN YAHAY DIIWAAN GELINTA

1. **SHAHAADADA DHALLASHADA**
   - Shahaadada dhallashada oo asal ah

2. **SAWIRKA AQOONSIGA (ID) EE WAALIDKA HAAYA ILMAHA**

3. **XAQIIJINTA DAGGANAASHADA – WAXAA LOO BAAHAN YAHAY LABO (2) CADDEYN OO DAGGANAASHO AH***

   ***Caddeynta la soo gudbiyo waa in** ay ahadaan kuwo la soo mariyay skaan ama sawiro la akhrin karo lana soo raaciyo arjiga*

   Dhaarta Dagganaashada: Haddii ilaaliyaha/waalidka haynta cunugga la daggan yahay saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo daggan gudaha xuduudda tagidda Dugsiga Dagamada Westerville, dagganahaas waa in uu keeno aqoonsiga sawirka (photo ID) iyo labo (2) caddeynta dagganaashada oo loo baahan yahay. Haddii dagganaha Westerville aad adiga la daggan tahay kireysto, magacaada (ilaaliyaha sharciga/waalidka haaya ilmaha) waa in lagu darro kiradaas.

   HAL (1) CADDEYN KA SOO QAADO A IYO HAL (1) CADDEYN KALE KA SOO QAADO B:

   A:
   - **Heshiiska Kirada/Ijaarka Iminka Jira*** lana raaciyo magaca waalidka haaya cunugga ee ku qoran kirada (lagana saari karo macluumaadka maaliyadda keliya), bogga saxiixa, iyo magaca iyo telefoonka milkiilaha hantida; ***AMA***
     ****Haddii kiradaada ku saleysantahay bil-ilaa-bil-, keenta heshiiskaas iyo xaqiijinta iminka jirta (laguna soo qora warqadda ganacsiga), aad ka soo qaadid sida magaca iyo nambarka telefoonka , magaca iyo nambarka telefoonka***
   - Bayaanka Deynta Hantida **Iminka Jirta** (lagu soo qoray taariikhda 30kii maalmood ee ugu dambeyay) lana soo raaciyay magaca waalidka haaya ilmaha (lagana saari karo macluumaadka maaliyadda keliya); ***AMA***
   - Heshiiska Iibsashada/Kunturaadka lagu iibsado hantida (haddii aad iibsashada hantida ku soo gabogabeysid muddo 90 maalin gudahooda laga bilaabo diiwaan gelinta) (lagana saari karo macluumaadka maaliyadda keliya) ; ***IYO***

   B:
   - Biilka Danabka Dadweynaha Iminka Jira (lagu soo qoray taariikhda 30kii maalmood ugu dambeyay), oo muujiya cinwaanka loo adeego ee guriga ku yaal Dugsiga Dagmada Westerville, magaca waalidka haaya ilmaha/ilaaliyaha sharciga ilmaha (sida Gaaska, Biyaha, Korantada, Telefoonka Dhulka, Kable, ama Internetka); **ama**
   - Warqadaha Iminka Laguu soo Diro (kuna qoran 30kii maalmood ee ugu dambeyay) oo muujiya cinwaanka Dugsiga Dagmada Westerville iyo magaca waalidka/ilaaliyaha haaya ilmaha (sida masaruufka la siiyo cunugga, kaalmada dawladda)

4. **DIIWAANADA TALAALKA** – Waa in la keeno diiwaanka (diiwaanada) talaalka ugu casriyeysan (sida warqad daabacan oo laga soo qaato Xafiiska Takhtarka). Sharciga La Baddalay ee Ohio (Ohio Revised Code) wuxuu rabaa in caddeynta talaalka la geliyo faylka 14ta maalin hore marka la furo dugsiga, haddii kale waxaa dhici doonto in ardayga laga joojiyo imaashada dugsiga.

   **Ardayda cusub ama kuwa soo noqda ee Dugsiga Dagmada Westerville ka soo gala waddan shisheeyo waa in ay keenaan warqado muujiya in baaritaanka TB yahay negatiifo (waxaa la jecel yahay Mantoux PPD) AMA raajada-X xabadka laga soo qaatay takhtar ama kliiniko ku yaal Mareykanka.*

5. **WARQADAHA FURIINKA/HAYNTA** (haddii tani quseeyso xaaladaada) **WAA** in maxkamadda laga soo saxiixo laguna soo shabadeeyo taariikhda/waqtiga
   - Ammarka Furiinka Kama Dambaysta lagana yaabo in lagu soo daro Qorshaha Waalidnimada La Qeybsadao (Shared Parenting Plan), taasoo hal waalid u magacaawdo waalidka guriga xagga meeleynta dugsiga ama
   - Wakaaladda Awoowaha/Ayeeyada ama
   - Ammarka Haynta ku Meel Gaarka ee magacaaba ilaaliye gaar ah ama
   - Wakaaladda Militariga

6. **QORSHAHA IEP, ETR ama 504 ee IMINKA JIRA** (haddii tani lagu dabaqi karo cunugaadad)

Marka aad dhamaysid arjiga diiwaan gelinta BALLAN KA QABSO!